

Diyaar Garawga Xaalada Degdeg ah

Waxaad ilaalisaa naftaada iyo qoyskaaga
inta lagu jiro wakhtiga bilaa laydhka ah




Waxa aanu samayn doonaa wax kasta oo nala gudboon, laakiin mararka qaar waxaan la filan karin ayaa dhaca. Waana taas sababta aanu u doonayno in dhamaan macaamiisheenu ay ugu diyaar noqdaan xaalada degdega ah.

Tilmaamahani waxa ay kaa caawin doonaan inaad u diyaar garawdo, wixii alaab aad u baahan tahay ah isku duba ridato oo aad badbaadada ilaaliso kahor, inta ay uu baxtiisan yahay laydhku iyo wixii ka danbeeya.

Shaxda Macluumaadka

- 3 **Khayraadka ay tahay in la ogaado**
- 4 **Diyaar garawga duufaanka ka horeeya**
- 5 **Macluumaadka xidhiidhka ee muhiimka ah**
- 6 **Liiska wixii loo diyaar sanayo xaalada degdega ah**
- 7 **Kahor inta aan la sheegin xaalada degdega ah**
- 8 **Waxyaabaha la samayn karo iyo waxaan la samayn karin inta uu bakhtiisan yahay laydhku**
- 9 **Badbaadada inta uu dabku bakhtiisan yahay**
- 11 **Waa maxay sababta uu u bakhtiyi karo laydhku**
- 12 **Barashada sida laydhka loo soo ceshanayo**



Ma leedahay caruur, xayawaan carbisan ama cid kale oo u baahan kaalmo gaar ah oo guriga joogta?

Tilmaamahani waxa ay sheegayaan talaabooyinka dheeraadka ah ee kaa caawin kara inaad ilaaliso badbaadada qoyskaaga.

Khayraadka ay tahay inaad ogaato

La hadal 911 wixii bilayska ah, dabka ama xaalada caafimaad ee degdega ah

KHADKA TOOSKA AH EE KAALMADA DEGDEG AH EE TORONTO HYDRO

Ka warbixinta bakhtiga laydhka ama dab yarida ee anaka lanagu soo gaadhsiinayo 24/7/
416-542-8000 (riix 1)

311 TORONTO

24/7 macluumaadka aan ahayn-degdeg ee adeegyada magaalada, oo ay ku jiraan digniinta iyo xarumaha qaboojiya, geedo qaadida/jajabinta iyo kuwa kale.

Garaac 3-1-1
toronto.ca/311
@311Toronto

BADBAADADA SHACABKA CANADA

Macluumaadka iyo khayraadka ku saabsan badbaadada iyo u diyaar garawga xaalada degdega ah.

getprepared.ca

MAAMULKA BADBAADADA LAYDHKA

Macluumaadka ku saabsan badbaadada laydhka iyo baadhitaankooda.

1-877-372-7233
esasafe.com

MAAMULIDA XAALADA DEGDEG AH EE ONTARIO

Digniinta degmada oo dhan ah, macluumaadka cusub iyo macluumaadka ku saabsan xaalada degdega ah ama laxaad la'aanta/

ontario.ca/alert
@OntarioWarnings

DEEGAANKA CANADA

Digniinta cimilada ee shacabbka iyo macluumaadka saadaasha cimilada.

weather.gc.ca

LAANQAYRTA CAS EE CANADA

Kaalmada bulshooyinka ay xaalada degdegu saamaysay.

1-800-418-1111
redcross.ca

ST. JOHN AMBULANCE

Kaalmada kowaad ee xaalada degdega ah, gaadiidka caafimaad iyo adeegyada qaxa.

416-967-4244
sj.ca

URURKA RAHANKA IYO GURYAYNTA CANADA

Macluumaadka ku saabsan dib u degista guriga kadib marka uu dhaco laydhka oo mudo badan bakhtiisnaada.

1-800-668-2642
cmhc-schl.gc.ca

XAFIISKA CAYMISKA EE CANADA

Macluumaadka noocyada xeerarka caymiska iyo waxa uu bixinayo kharashkiisa.

416-362-2031
ibc.ca

DAAWAYNTA MAQAL IYO MUUQAALKA EE ONTARIO

Suaalaha iyo walaacyada ku saabsan caafimaadkaaga.

1-866-797-0000
ontario.ca/page/get-medical-
advice-telehealth-ontario

Diyaar garawga duufaanka ka horeeya

Waxaa wax loo aayo ah inaad u diyaar noqoto-aad raacdo liiskan oo aad markaa xaqiijiso in qof kasta oo qoyskaaga ah uu garanayo waxa uu samaynayo hadii ay dhacdo xaalad degdeg ahi.



U diyaar ahaw xaalada degdeg ah

1. Daabaco tilmaamahan oo waxaad dhigataa meel badbaado ah.
2. Waxaad samaysaa ama aad cusboonaysiisataa bushqadaada xaalada degdeg ah ee 72 saacadood.
3. Macluumaadka xidhiidhka ee ugu danbeeya gasho macluumaadka xidhiidhka ee xaalada degdega ah.
4. Waxaad samaysataa meel aad ku kulantaan hadii aad qaxdaan.



Agabka xaafimaadka ee laydhka ku shaqeeya?

Hadii cid kamid ah qoyskaagu uu caafimaadkiisu ku tiirsan yahay agabka caafimaadka ee laydhka ku shaqeeya, sida marooxad ama mishiinka ka shaqaysiiga kalida, fadlan anaka naga duwaan geli si markaa aanu kuula socodsiino bakhtiinta laydhka ee qorshaysan.

Lahadal **416-542-8000** ama waxaad ka buuxisaa foomka:

torontohydro.com/beprepared



Inay digniintu kusoo gaadho!

Waxaad iska duwaan gelisaa wargelimaha bakhtiga laydhka iyo wargelimaha soo noqodka iimeel ahaan:

mytorontohydro.com (hoos yimaada My Services (Adeegyadayda))



Marka ay cimilo aad u xun ay soo socoto

1. Waxaad ogaataa agabka aad haysanayso (sida raadhiyaatarka biyaha kulul) iyo sida loo ilaalinayo .
2. Bakhtii ama ka saar wixii agab ah ee laydhka ku shaqeeya ee aan markaa loo baahnayn.
3. Taleefankaaga dabee si markaa uu baytarigu kuugu buuxo hadii ay dhacdo in laydhku uu kaa bakhtiyo.
4. Soo iibso wixii dawo lagu qoray ah.
5. Xidh daaqadaha, albaabada, iyo alaabta guriga iyo agabka.
6. Waxaad buuxsataa shidaalka gaadhiga oo markaa waxaad dhigataa meel badbaado ah, hadii ay macquul tahay.

Macluumaadka xidhiidhka muhiimka ah

Waxaad qaadataa wakhti si aad u qorto wixii macluumaad ah ee muhiim ah ee aad u baahan karto xaalada degdeg ah. Waxaad xaqiijisaa in xubin kasta oo qoyskaaga ahi ay garanayso halka ay ka heleyso macluumaadkan.

MEESHA LAGU KULMAYO XAALADA DEGDEGA AH

Goobta:

MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA XAALADA DEGDEGA AH

Magaca:

Cinwaanka:

Taleefanka:

DHAKHTARKA QOYSKA

Magaca:

Taleefanka:

Dawada/xadiga la cunayo/xaalada caafimaadka/aaladaha caafimaadka:

FARMASIGA

Cinwaanka:

Taleefanka:

SHIRKADA CAYMISKA

Magaca:

Taleefanka:

Lambarka Caymiska Guriga:

Lambarka Caymiska Gaadhiga:



Waxaa jira sadex dariiqo oo aad kula socon karto

1. Eeg macluumaadka ugu danbeeya ee bakhtiga laydhka ee aagaaga iyada oo aanad haysan maabka onlineka ah:

torontohydro.com/outagemap

2. Kala soco **@torontohydro** Twitter-ka macluumaadka ugu danbeeya.

3. Waxaad saxaafada deegaanka kala socotaa wararka, macluumaadka ugu danbeeya iyo tilmaamaha ay maamulku bixinayaan, ama qoyskaaga ama asxaabtaa hakuula socoto.

Luuska bushqada xaalada degdeg ah



Cuntada iyo biyaha

- Biyaha moorsan (4 litir qofkiiba maalintii)
- Birta daasadaha lagu furo
- Cunto aan cumaanaynin, oo diyaar ah
- Bilaydhada marka kaliya la isticmaalo, koobab iyo agab



Bushqada kaalmada caafimaad ee kowaad iyo dawooyin

- Bushqada kaalmada caafimaadka ee kowaad
- Baxda wax qaboojisa iyo xidhoomin baraf ah si markaa ay dhamaan dawooyinka kuugu qaboojiso
- Dawo mudo hal todobaad ah kugu filan wixii dawooyinka muhiimka ah iyo nuqulada dhamaan wixii lagu qoray



Agabka caaga ah iyo agabka

- Toos iyo baytaryo
- Bacda qashinka iyo kilinikis
- Kibriid iyo laytar
- Irbado iyo wixii la socda
- Raadyaha dabaysha ama baytariga ku shaqeeya
- Waraaqo iyo qalin
- Xadhiga danbeeya gaadhiga ama kaydiye dan wixii aalada la dabeeyo ah
- Dab damiye
- Agabka aas aasiga ah oo ay ku jiraan mindiyo, dhilayaal, dismis, xabag iyo baanad
- Gorida jihada sheega iyo siidhi
- Lacag (ATM waxaa dhici karta inayna shaqaynin wakhtiga laydhku bakhtiisan yahay)



Wixii nadaafada

- Baaldi loo isticmaali karo suuli ahaan wakhtiga xaalada degdega ah
- Jaafeesha dareeraha ah ee guriga ama kiniinka biyaha nadiifiya
- Wixii jeermiska lagula dagaalamo inta guriga la joogo
- Bacaha dib loo iibin karo
- Gacmo nadiifiye



Loogu talo geley caruurta iyo sabiga

- Caanaha iyo masaasada ilmaha
- Dawooyin
- Xafaayad iyo kilinikis



Wixii xayawaanka carbisan ah

- Cunto, biyo iyo madiibad
- Duwaanka caafimaadka iyo talaalka
- xadhiga, ama wax lagu xidho
- Lambarada taleefanka xarumaha lagu xareeyo xayawaanka ee deegaanka
- Aqoonsiga iyo liisanka

Kahor inta aan la sheegin bakhtiga laydhka

Bakhtiga laydhku ma waxa uu ku xadidan yahay gurigan?

Hadii uu xaafadaada ka bakhtiisan yahay, waxaa dhici karta in uu fuyuuska guud iska jaray. Waxaad ku garan kartaa marka uu iswiijku joogo meel u dhaxaysa "off (bakhti)" iyo "on (shidnaansho)" meel ah. Waa tan sida aad si badbaado ah dib ugu shidi kartaati:

- 1 Waxa aad ka saartaa wixii alaab ah ee aad u aragto inuu keenayo culayskan.
- 2 Waxaad isticmaashaa toosh, waxaad furtaa albaabka meesha uu ku jiro.
- 3 Waxa aad gaadhsiisaa "off" oo kadibna waxaad ku celisaa "on".
- 4 Hadii markaa fuyuusku uu mar kale iska jaro, dib ha u shidin. Waxa laga yaabaa inuu muujinayo mushkilad ka wayn waana inaad markaa la xidhiidhaa xirfadle laydhka ah.
- 5 Hadii uu weli gurigaagu weli leeyahay fuyuusyo, waa inaad ku badashaa furuus buni ah.



Xaafadaha dhan miyaa?

Cid kasta oo degan jidkaagu ma bilaa laydhbaa, waxaad gaadhsiisaa laydh la'aanta xaafadaada online ahaan

[torontohydro.com/
reportoutage](https://torontohydro.com/reportoutage)

ama la hadal

416-542-8000.

Waxyaabaha la samayn karo iyo waxaan la samayn karin inta uu bakhtiisan yahay laydhku



Waxa aad samayn karto

- Xidh daaqaadaha, albaabada, iyo alaabta guriga iyo agabka
- Isticmaal toosh, halka aad ka isticmaali lahayn shamac, marka ay macquul tahay. Hadii aad isticmaalayso shamaca, iyada oo ayna cidna la joogin hakaga tagin
- Waxaad ka saartaa wixii agab ah iyo wixii elektoroonig ah, oo waxa aad hoos u dhigtaa heerkulka ilaa inta ugu hooseysa si markaa aad uga ilaaliso dabka is badbadalaya marka dib loosoo celiyo laydhka.
- Waxa aad ku gurtaa wixii cunto ah ee xumaanaysa sida caanaha, wixii xoolaha laga sameeyay, hilibka, kaluunka, beedka iyo wixii cunto ee soo hadha baraadad uu baraf ku jiro
- Waxa aad iska daadisaa wixii cunto ah ee xumaan karta marka la dhigo heerkul 4°C ama ka badan mudo laba saacadood wax ka badan ah. Marka aad ka shakido, iska daadi.
- Waxa aad ka warhaysaa asxaabtaa iyo jaarkaaga, oo waxa aad siisaa caawimaad marka ay u baahdaan
- Waxa aad yaraysaa isticmaalka taleefanka gacanta si aad baytariga u ilaashato oo waxa aad gaysaa qaabka baytariga lagu kaydsado
- Jiilaalka, waxa aad furtaa in yar oo aad ku daysaa qasabada si aanu beebku u barafobin
- Waxa aad janareetarka dhigtaa banaanka, meel aan u dhawayn albaabada iyo daaqaadaha



Waxa ay tahay in aanad samaynin

- Ha isticmaalin moofada, kulayliyaha taangiga borobeenta ama janareetarka inaad guriga soo geliso ama meel xidhan sida geerashka, barandada dadan iyo hadhka. Agabkani waxa ay dhaliyaan kaarboon monoksaydh badan, kaas oo khatar ah
- Ha isticmaalin shoolada gaasta ah kulayliye ahaan
- Ha furin talaagadaada ama qaboojiyahaaga inta aad u baahan tahay wax ka badan. Talaagada buuxdaa waxa ay cuntada hayn kartaa ilaa 48 saacadood hadii albaabka su buuxda loogu xidho. Talaagada aan la furin waxa ay cuntada u horseedi kartaa inay ku qabawdo afar saacadood.
- Ha u dhawaan meel bir laydh ka taagan tahay, sida meelaha guriga qaybta hoose ah ee daadku galay ama dhismaha.
- Ha u dhawaan ama taaban beebka jaban. Waxa aad ka fogaataa ugu yaraan 10 mitir (inta qiyaastii uu le'eg yahay baska dugsigu) oo anaka nasoo gaadhsii markaga adiga oo nagala soo xidhiidhaya **416-542-8000 (riix 1)**

Badbaadada wakhtiga uu laydhku bakhtiisan yahay



Badbaadada janareetarka

- Kaliya waxa aad ku isticmaashaa janareetarka banaanka si markaa aad uga hortagto inaad ku sumawdo kaarboon monoksaydhka
- Waxa aad janareetarka dhigtaa meel aan u dhawayn albaabada iyo daaqadaha
- Si toos ah weligaa ha ugu xidhiidhsiin waayarada gurigaaga janareetarka. Waxa aad agabka toos u gelisaa fiishta ka imanaysa janareetarka
- Waxa aad isticmaashaa fiishta dabka badan oo isticmaalo ee banaanka la dhigi karo
- Waxa aad raacdaa tilmaamaha warshada ee xadhiga garawnka ee janareetarka
- Hadii aad dawakhsan tahay, yalaalugoonayso, wareereyso ama neeftu kugu adkaato inta aad isticmaalayso janareetarka, waxa aad markaba doonataa hawo daray ah oo waxa aad doonataa daawayn dhakhtar



Badbaadada daadadka

- Ha gelin meesha dhulka hoostiisa ah ee daadadku ku jiraan iyada oo aad hubto moojee in aanu xadhig dab ahi ku jirin moojee
- Hadii ay meeshu biyi badan fadhiyaan oo uu markaa laydhkaaguna shidan yahay **416-542-8000** si lagaaga bakhtiyo laydhka
- Haka saarin laydhka wixii alaab ah ee ay khasab kugu tagay inaad biyaha dhax istaagto marka aad ka saarayso laydhka. Waxaa taas kamid ah bulaacada dhulka
- Ha isticmaalin wixii agab, fiishash ah, iswiijyo ama fuyuusyo hadii biyuhu soo gaadheen ilaa inta uu eegayo ee uu nadiifinayo xirfadle laydhka ahi.
- Waxa aad ka fogaystaa fiishashka iyo janareetarka biyaha



Hadii ay tahay inaad guriga ka baxdo

Waa tan sida aad nidaamkaaga qasabada u ilaalinayso hadii ay tahay inaad guriga ka baxdo. Hadii aad ka shakido, waxaad la xidhiidhaa xirfadle qasabadaha ah.

1. Waxa aad bakhtiisaa iswiijka guud ee gurigaaga.
2. Waxa aad xidhaa biyaha meesha guud ee ay kasoo galaan gurigaaga. Waxa aad ilaalisaa sacada, qasabadaha iyo beebabka oo waxa aad ku duubtaa buste ama wax diiriya.
3. Waxa aad ka bilawdaa dabaqa sare ee gurigaaga, waxa aad turtaa dhamaan qasabadaha iyo meesha suuliga biyaha laga raaciyo si aad markaa uga gororiso biyaha nidaamka qasabadaha.
4. Marka aad ka gororiso, dib u fur biyuhu kaaga guriga keena si markaa ay u qul qulaan. Kaliya waxaad furtaa qasabada qabaw ee meesha ugu hooseysa (bulaacada) ama fur qasabada ku taal dhulka hoostiisa oo waxa aad xidhaa dhamaan qasabadaha.
5. Waxaad ogaataa hadii ay tahay inaad ka fororiso biyaha kulul maadaama oo ayna isku wada mid ahayn taangiyadu. Kulayliyayaasha kale ee biyaha qaar ayaan shaqaynin marka uu dabku bakhtiyo. Hadii loo baahan yahay in biyaha kulul taagtiga laga gororiyo, waxa aad markaa samaysaa inaad ka gororiso qasanada ilaa meesha uu ku gorarayo.



Kadib marka uu bakhtiyo laydhku

- Hadii wixii agab ah iyo xadhka gurigaaga garab mara ee gurigaaga laydhka u keenaa ay waxyeeloobaan, waa inuu kuu hagaajiyaa xirfadla laydhka ah oo ay ansixisay Maamulka Badbaadada Laydhka (Electrical Safety Authority, ESA) kahor inta aanaana laydhka kuusoo celin
- Waxa aad soo gaadhsiisaa macluumaadka wixii geedaha soo dhaca ama laamaha ee hantida ay leedahay magaaladu 311
- Hadii uu geedku hantidaada dhax yaalo oo uu u dhaw yahay xadhiga dabka, waxa aad qabsataa shaqaale liisan haysta oo kaa qaada
- Waxa aad gurigaaga qaybta dhulka hoosteeda ah ka eegtaa in daadad galeen. Ha u dhawaan biyo taagan
- Waxa aad marka danbe dib u shidaa wixii agab ah ee daruuriyaadka ah. Waxa aad sugtaa 10 ilaa 15 daqiiqo kahor inta aanad dib u shidin wixii agab ah ee laydhka ku shaqeeya si markaa nidaamka laydhku u xasilo
- Waxa aad xaqiijisaa in kulayliyaha biyahaagu uu buuxo kahor inta aanad shidin. Hadii kale, waxa uu ku keeni karaa waxyeelo shayada kulaylka.
- Waxa aad dib u shidaa saacada, tiriya wakhtiga iyo digniinta
- Waxa aad dib ugu gurataa alaabta bushqadaada xaalada degdeg ah

Waa maxay sababta uu u bakhtiyi karo laydhku

Waxa aad kordhinaynaa oo aanu balaadhinaynaa laydhka Toronto si markaa gacan looga gaysto adeegyada iyo isku halaynta laydhka ee dhamaan magaalada. In kasta oo marka hore loo diyaar garoobay, waxaa dhici karta inuu bakhtiyi laydhku mararka qaar. Waa kuwan waxyaabaha ugu waawayn ee kaanaayi.

CIMILADA AADKA U XUN

- Duufaana, dabaylaha, iyo barafka ayaa keena inay kusoo dhacaan geeduhu xadhkaha laydhka oo ay markaa waxyeelayaan agabka laydhka
- Roobabka iyo daadadka ayaa waxyeeli kara agabka dusha iyo wixii dhulka hoostiisa ah

XUMAANSHAHA AGABKA


- Agabkii hore oo gabooba ayaa keena inuu yimaado khalkhalku
- Shaygu inuu jabo waxaa keeni kara murugsanaanta agabka laydhka

WAAYITAANKA ALAABTA

Waayitaanka alaabtu waxa uu yimaadaama marka Hydro One ay la kulanto mushkilad dabka ah oo markaa aanu gaadhsiin karin laydhka. Marka ay taasi dhacdo, nooma tuurto gal aha in aanu macaamiisha gaadhsiino laydh ilaa Hydro One la dayactirayo.

BAKHTIGA LAYDHKA

- Shilalka gaadiidka waxa ay jabin karaan birta ama waxa ay soo daadin karaan xadhkaha laydhka
- Shuuqshuuqa iyo xayawaanka kale waxa ay isasoo gaadhi karaan agabka, kuwaas oo markaa waxyeelo gaadhsiinaya
- Shaqaalaha qandaraaslayaasha ah waxa ay si kama ah u aasi karaan khalda inta ay qodayaan
- Geedaha aan dhicin waxa ay gaadhi karaan xadhkaga dabka



Dakhtiga laydhka ee qorshaysan

Laydhku waxa uu bakhtiyaa mararka qaar kaas oo la qorsheeyo si markaa shaqaalaha ay si badbaado ah ugu dhamaystiri karaan dayactirka, ka shaqaynta ama kordhinta agabkeena. Marka taas loo baahan yahay, waxa aanu samaynaa wax kasta oo nala gudboon si markaa macaamiisheena wakhti hore ugu sheegno.

Sida loo adeegsan karo dib u shidida dabka

Mararka qaar dabku waxa uu maqnaan karaa dhawr daqiiqo, halka mararka qaarna uu mudo dheer bakhtiisnaan karo. Shaqaalaha waxa ay shaqeyaan habeen iyo maalin si markaa ay ugu soo celiyaan laydhka sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macquulsan.

Marka laga soo warbixiyo bakhtiga laydhka, waxa aanu raacnaa talaabooyinka soo socda:

- 1 Shaqaalaha ayaa la diraa**


Shaqaalaha ayaa qabta meesha laydhku ka bakhtiyay kuwaas oo maraya wadooyinka aynu inteenaa kale marno. Waxa ay ka dhigan tahay in marka ay saxmadu jirto socdaalkooda hoos u dhigayso.
- 2 Waxyeelada ayaa la qiimeeyaa**

Waxa ay qaadan kartaa wakhti in la ogaado meesha rasmiga ah ee mushkiladu ka jirto, gaar ahaan hadii ay waxyeelo ku taxaluuqdo agab dhulka hoostiisa ah. Dayactirka lama samayn karo ilaa la ogaado waxa keeney.
- 3 Dayactirka waa la dhamaystiray**

In kasta oo wax kasta aanu samayno si aanu u yarayno wakhtiga aanu kusoo celinayno, mar kasta nooma suurto gasho.
- 4 Tijaabinta agabka**

Shaqaaluhu waxa ay xaqiijiyaan in mushkilada ay xaliyaan oo markaa dabka si badbaado ah loosoo celiyo.
- 5 Soo celinta laydhka**

Waxa aanu usoo celinaa danba dhamaan macmiilka uu sameeyay



Miyaad og tahay?

Kaliya 12% oo dadka reer Ontario ah ayaa leh bushqada xaalada degdeg ah oo ay ugu jirto waxay sadex maalmood istimaali karaan-laakiin cimiladeena aan la saadaalin karin, waxaa lagaga maarmaan ah inaad qorshaysato waxa ugu daran ee dhici kara. Hadii ay tahay dabaysha barafka wadata, daadadka ama duufaanada, waxa wixii kaalmo ah ee aad heli kartaa qaadataa wakhti marka ay mushkiladu dhacdo. Waa taas markaa ta kuu sahlaya inaad naftaada ku filnaan karto ugu yaraan 72 saacadood.